

Shaqaalaha maxkamadda waxa ay diyaar kuugu yihiin in ay sida ugu wacan wax kaa caawiyaan. Doorokooda ah in ay kaa caawiyaan halka ay dantu kaa soo gasho, marka laga reebo talada sharciga. Waxaa loo tababaray in aysan ka jawaabin su'aalo aysan jawaabtooda aqoon u lahayn anyna kuu diran meelo kaa caawiya sida aad ku heli lahayd akhbaarta aad codsanaysid.

## SHAQAALAHA MAXKAMADDA WAXA KUU QABAN KARAAN IYO WAXA AYNA QABAN KARIN:

- Waxa ay ku siin **karaan** akhbaarta kiisaska maxkamadda, haddii uusan sharciga diidaynin.
- Waxa ay ku siin **karaan** akhbaarta guud ee sharciyada, hab-maamuska iyo nidaamka maxkamadda.
- Waxa ay ku siin **karaan** foomanka ay maxkamadda fasaxday (foomanka kiisaska oo idil lama wada heli karo).
- Waxa ay kaa cawin **karaan** buuxinta foomanka maxkamadda maslaxada, xadgudubka guriga, iyo kadeedka\*.
- Waxay ku siin **karaan** jadwalka maxkamadda iyo akhbaarta ku saabsan sida arrimahu uga mid noqdaan jadwalka maxkamadda.
- Kuma siin **karaan** talooyin ku saabsan haddii aad xaraynaysid kiis ama haddii aad ku dhaqaaqaysid tallabo kale.
- Kuuma sheegi **karaan** waxa aad maxkamadda ka oran lahayd.
- Kuuma sheegi **karaan** waxa uu garsoorahu kugu samayn karo.

- Kuuma aruurin **karaan** qaaraanka lagugu xukumay.
- Kuma sii **karaan** warqadaha boostoda lagugu soo dirayo.

**Xusuuso**, shaqaalaha maxkamadda waxa ay kuu gudbinayaa waa akhbaar, sharciga ma kuu fasirayaan. Shaqaalaha maxkamadda iskama dhigi karaan in ay qareen kuu yihiin. Haddii aad isdifaacaysid adiga ayaa qaadaya awoodda uu leeyahay qareenka.

Haddii aad dooratid in aad qareen qabsato, maclumaadka sharciga ee buuggan yar ku qoran ayaa kaa caawin kara sidii qareen xirfad u leh qaybtaa sharciga ah aad ku heli lahayd. Waxaad ka helaysaa macluumaadka ujrada, aadeyada oo qaarkood lacag ah, qaarna loo eegaya inta aad awoodid, qarna lacag la'aan ah.

\*Akhbaar dheeraad, eeg Dastuurka Minnesota 491A.02, 518B.01, 609.748, iyo Xeerka Maxkamadda Degmada Minnesota 504 (b)(2).

## HELISTA QAREENKA:

Barnaamijyada U-diridda Ururka Qareenka ee

Degmada Anoka (County)  
[www.anokabar.org/FindingaLawyer.html](http://www.anokabar.org/FindingaLawyer.html)

Demada Dakota	952-431-3200
Degmada Hennepin	612-752-6666
Degmada Ramsey	651-224-1775

Degmoyinka kale ee Minnesota  
800-292-4152  
[www.mnfindalawyer.com](http://www.mnfindalawyer.com)

Qareennada Ujrada Yar ama Lacagla'aan

Haddii aad danyar tahay, qareen lacag yar qaata ama lacag la'aan ka eeg [www.lawhelpmn.org](http://www.lawhelpmn.org) ama wac Xafiiska Gargaarka Sharciga. Barnaamijyada Lagugu Farayo Ururka Qareennada ayaa dhici karta in ay hayaan akhbaarta barnaamijyada qareennada lacagla'aanta.

## INTERNET DHEERAAD:

Maxkamadaha Gobolka Minnesota  
[www.mncourts.gov](http://www.mncourts.gov)

Maktabadda Sharciga ee Minnesota  
[www.lawlibrary.state.mn.us](http://www.lawlibrary.state.mn.us)

Maxkamadaha Gobolka Minnesota Xarunta Iskaa Wax-uqabso  
[www.mncourts.gov/selfhelp](http://www.mncourts.gov/selfhelp)

Rugta Foomanka Maxkamadda  
[www.mncourts.gov/forms](http://www.mncourts.gov/forms)

Cawiimada Sharciga ee Minnesota  
[www.lawhelpmn.org](http://www.lawhelpmn.org)

Tiirarka Dastuurka Minnesota  
[www.leg.state.mn.us/leg/statutes.asp](http://www.leg.state.mn.us/leg/statutes.asp)


Ururka Qareennada Gobolka  
[www.mnbar.org](http://www.mnbar.org)

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Minnesota  
[www.ag.state.mn.us](http://www.ag.state.mn.us)

## Adeegyada Hufan

Garsoorka Minnesota waxa ka go'an in ay bixiso adeegyada la xariira macaamisha dibadda sida ugu habboon. Macaamisha dibadda waa dhinacyada dacwadda, qareennada, xeer-beegta, markhaatiyada, dhibanayaasha, wakiilada saxaafadda, u doodayaasha, maxkamadaha racfaanka, dadka haya qalabka dambiyada, iyo dadweynaha maxkamadda u yimid in hawlo loo qabto. Gaarista hadafkan, qof kasta oo la shaqeeya maxkamadda (oo ay ku jiraan Garsoorayaasha, Shaqaalaha garsoorka iyo maamulka) waa inaydaadaal weyn u galan in ay:

1. Muujiyaan xushmad iyo furfurnaan;
2. Kula dhaqmaan siinaan iyo caddaalad;
3. Bixiyaan adeegyada heerka sharcigu fasaxayo si degdegsiiyo iyo gacma furan ah oo af iyo qoraalba ah arrimaha la xariira macluumaadka iyo hababka kiiska.
4. Diyaariyaan heerka sharcigu fasaxayo, macluamad ku filan ee la xariira waxa laga doonayo habka maxkamadda iyo sida loo adeegsanayo tusaalooyinka. Macluumaadka iyo foomanka waa in loo sameeya sida ugu sahlan oo loo akhrin karo, loona fahmi karo.
5. Bixiyaan adeegga ay ku jiran sidii loo yareyn lahaa dhibaatooyinka shakhsiga ah inta suurtagal ah.



## WAXA SHAQAALAHA MAXKAMADDU KUU QABAN KARAAN IYO WAXA AYNA KUU QABAN KARIN

Jun 2006

State Court Administration  
Court Services Division  
105 Judicial Center  
25 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd.  
St. Paul, MN 55155  
651-297-7587